



# Fahmida Ku Tiirsanaanta Cayrta

Understanding Public Charge

## Waa maxay ku tiirsanaanta Cayrtu?

Qaar ka mid ah dadka codsadda (green card) ka (Sharciga Rasmiga ah ee Deganaanshaha) ama fiise ay ku soo galaan Mareykanka (U.S.) waa inay ku gudbaan imtixaan ku saabsan “ku Tiirsanaanta cayrta.” Imtixaanka ku tiirsanaanta cayrta waxa uu go’aamiyaa inay u eg tahay inay u badan tahay in qof uu u baahnaan doono ku tiirsanaan dowladdu uu dhaqaale ahaan ugu tiirsanaan doono. Waxay kaloo eegaan haddii qof qoyska ka mid ah ama qof kale uu adiga kafiil kaa noqonayo, waxa ay yihiin dakhligoodu iyo ilaha wax ka soo galaan dadkaa.

Mas’uuliyiinta laanta socdaalku waxa ay eegaan xaaladda guud ee qofka. Sidda waxyaabaha:

- Da’da
- Dakhliga
- Caafimaadka
- Aqoonta iyo Xirfadaha
- Xaaladda Qoyska



Kaliya 2 nooc oo manfacyada dowladda ah ayuu xisaabiyaa imtixaanka ku tiirsanaanta cayrtu:

1. Barnaamjiyada lacagta cadaanka ah oo bixiya lacag markaa la qaato. Tusaalooyin kuwaa ah waxaa ku jira MFIP, SSI, iyo Gargaarka Guud (GA).
2. Daryeelka mudadda dheer ee rugaha haynta dadka lagu bixiyo, sidda guryaha haynta ee ay dowladdu bixiso kharashkooda.

## Ku tiirsanaanta cayrtu aniga ma i quseeysaa?



**Ma tahay muwaadin Mareykan ah (U.S.)?**

Ku tiirsanaanta cayrtu KUMA quseeyo adiga.



**Adiga ama xubnaha qoyskaagu ma leedihiin sharci degaansho ah (green cards)?**

Ku tiirsanaanta cayrtu KUMA quseeyso adiga kolka aad cusboonaysiinayso sharcigaaga deganaanshaha (green card) ama aad codsato inaad noqoto Muwaadin Mareykana (U.S.).



**Ma codsanayaa, ama ma leedahayba mid ka mid ah sharciyadan soo socda: TPS, Fiisaha U ama T, Sharci Magengeliyo ama Qaxooti ama sharci Gaar ah ee Kurayda muhaajirka?**

Ku tiirsanaanta cayrtu KUMA ay quseeyso adiga.



## Ma qorsheynaysaa inaad dalbato sharciga (green card) ee ehelka lagu qaato?

Ku tiirsanaanta cayrta kolkaa waxaa dhici karta inay adiga ku quseeyso. La hadal qareenka sharciga muhaajirnimada (immigration) qaabilsan ka hor inta aadan u dirin wax codsi ah hay'ada USCIS.

## Qaadashada manfacyada cayrtu miyey wax u dhimi sharcigayga?

Barnaamijyadan soo socda ee manfacyadda cayrtu MA AY saameeyaan sharcigaaga iyo codsiga sharci qaadashada:



- Kaarka Caafimaadka (MA) (marka laga reebo daryeelka haynta dheer) iyo MNCare
- Barnaamijka Kaarka Caafimaadka ee Carruurta (CHIP)
- Baarida, daweynta iyo talaaladda cudurka COVID



- SNAP / EBT / cuntadda cayrta (food stamp)
- WIC
- Qadadda bilaashka ama jaban ee iskuulku bixiyo
- Cuntadda Deeqda ahaanta loo bixiyo ama cuntooyinka karsan ee bilaashka ah



- Lacagta canshuurta uga soo noqota dakhliga la kasbado
- Lacagta canshuurta ilmaha la isugu soo celiyo



- Wax gargaarka dhanka guryaha ah, sidda (Section 8) iyo Guryaha Dowladda
- Hoyga

## Xaggee ayaan ka heli karaa akhbaar kale oo dheeraad ah ama caawimaad?

Gargaaradda dhanka Sharciga (Legal Aid) ahi waa bilaash waana qarsoodi, wac 1(800) 292-4150

Ka Hel hay'ado kale oo ku caawin kara barta [www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics](http://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics).

Si aad uga hesho Khayraadyo kale, gal barta [pifcoalition.org](http://pifcoalition.org)

Si aad si buuxda dib ugu eegto guudmarka ilaha ku tiirsanaanta cayrta ee hay'ada USCIS, booqo <https://www.uscis.gov/green-card/green-card-processes-and-procedures/public-charge/public-charge-resources>.

**Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.** Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.